



## Macallimida Bridger ee Michelle Nicola oo heshay deeqda lacageed ee Fulbright

Michelle Nicola, oo dhawaan dhammeysatay ahaanshaha macallimada luqadda farashaxanka iyo Isbaanishka ee Dugsiga Bridger, ayaa deeq lacageed ka heshay Fulbright si ay wax ugu soo barato Mexico.

Nicola, oo sanad dugsiyedka soo socda u wareegi doonta Dugsiga Dhexe ee Grant, waxay ka mid tahay 35 muwaadiniin Maraykanka oo hal simistar dibadda wax ku soo baran doona iyada oo isticmaalaya lacag deeq ah oo laga helay Waaxda Arrimaha Dibada iyo Guddiga Deeqda Waxbarasho ee William Fulbright. Waxay wax ku soo baran doontaa Mexico laga bilaabo Sibtambar 1-deeda ilaa Diisambar 1-deeda iyada oo bilaabaysa in ay macallimada Isbaanishka iyo ku takhasusaha tacliinka ka noqoto Grant.

Lacagaha deeqda ee Fulbright waxaa la isku siiyaa iyada oo la eegayo guusha tacliimeed iyo xirfaddeed iyo muujinta kartida hoggaamineed. Fulbright waa barnaami ardayda lagu kala bedesho oo caalami ah oo ay maalgeliyeen dowladda Maraykanka isla markaana loogu talagalay in lagu dhiso xiriiro joogto ah oo u dhexeeya dadka ku nool Maraykanka iyo wadamada kale. In ka badan 160 dal ayaa ka qayb qaata.

Nicola waxay wax u soo dhigtay ardayda fasalka lixaad ee Bridger. 2014, waxaa la siiyay Abaalmarinta Dulqaadka Waxbarashada ee loogu talagalay Wanaaga dhanka Wax barida oo ay bixiyeen Xarunta Sharciga ee Saboolnimada Koonfurta ‘Southern Poverty Law Center’. Waxay u adeegtaa kooxda Hoggaaminta Luqadda Adduunka ee PPS iyo Guddiga Cadaaladda Cimilada, kuwaasi oo “raadiya awoodsiinta wax barayaasha iyo araydayda si loo baaro waxa keena isbedelka dhanka cimilada iyo sidoo kale xalalka suurtagalka ah, iyadoo oo loo ololaynayo in hoggaamiyayaasha degmadu ay bixiyaan waxyaalaha loo baahan yahay si sidaasi loo sameeyo.”